

CCS ELEVATE

LINDEN-MCKINLEY GRADE BAND STANDARDIZATION

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadayaan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad-raadraacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guiddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.

Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreyya ee Guiddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyeyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyo qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.

Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha guud waxa ay ku talinayaan in Guiddida Waxbarashadu ay mideeyaan ardayda fasalka lixaad ee habka heerarka kala soocidda ardayda Linden-McKinley ilaa Linden-McKinley, iyaga oo abuuraya goob ah fasallada 6-ilaa12-aad oo leh dugsi dhexe iyo dugsi sare oo isku dhul-wax-barasho ah (isku campus ah).

Dugsiga Linden-McKinley STEM Academy (1928) ayaa u adeegi kara 886 arday; si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sanad-dugsiyeedka 2023-2024, 704 arday oo kaliya ayaa iska diiwaan-gelisay, iyada oo heerka adeegsiga hadda uu yahay 80%.

Dib-u-habaynta habka heerarka kala soocidda ardayda ee xuduuda imaanshaha dugsiga Linden-McKinley iyo soo dhawaynta ardayda fasalka lixaad ee **Hamilton STEM, Linden STEM, South Mifflin STEM, iyo Windsor STEM** ee Linden-McKinley STEM Academy fasallada 6-ilaa 12-aad waxay habayn doontaa kooxaha muusikada fasalka ee ardayda dugsiga dhexe (6-ilaa 8-aad). Siinta ardayda fasalka lixaad ee waayo-aragnimada dugsiga dhexe ee caadiga ah iyo wakhti waxbarasho oo dheeraad ah.

Ku soo dhaweynta ardayda fasalka lixaad ee Linden-McKinley waxay siin doontaa dhismo ka weyn kii hore oo ah fursado lagu bixiyo wax-bixinno xooggan, tiyaatar iyo xarumaha ciyaaraha fudud. Tani waxay siin doontaa ardayda dugsiga dhexe hawlo badan oo ka baxsan manhajka sida muusikada, hadalka iyo doodaha, jilidda farshaxanka iyo ciyaaraha fudud.

